

Taageerada iyo Degaanka ka dib marka la Diido Dalbashadaada Magangalyo iyo Rafcaannada oo dhan

Haddii Home Office* uusan go'aan ka gaarin dalbashadaada magangalyo, ama haddii ay jiraan rafcaanno kuu maqan, waxaad xaq u yeelan kartaa taageerada NASS*. Taageeradaada waxaa laga yaabaa in la beddelo haddii dalbashadaada magangalyo iyo rafcaannada oo dhan la diido.

Maa la diiday dalbashadayda magangalyo iyo rafcaannada oo dhan?

Haddii aadan hubin, ama xaaladda waddankaaga hooyo ay isbeddeshay, waxaad u baahan tahay in aad islamarka suurogalka ah doonato talobixin sharciyeed - talobixin weydiiso looyarkaaga ama hawl wadeen dacwadeed weydiiso liiska looyarrada.

Taageerada ka dib marka la diido dalbashadaada magangalyo iyo rafcaannada oo dhan

Waxaa dhib noqon karta in aad hesho degaan ama taageero ka dib marka la diido dalbashadaada magangalyo. Hase yeeshee, waxaa jira xoogaa fursado ah:

1. **Taageerada Qodobka 95** - taageerada aad qaadatay intii dalbashadaada magangalyo ay socotay
 - Haddii aad leedahay carruur 18 jir ka yar oo kula nool ka hor inta aysan joogsan taageeradaada ee Qod95 NASS*, taasi caadi ahaan way sii socon doontaa ilaa iyo inta ay carruurtaadu dhammaantood 18 jir gaarayaan.
 - Haddii aadan carruur lahayn, taageeradaada NASS S95* waxay joogsan doontaa 21 maalmood ka dib marka ugu dambaynta lagu diido magangalyada. NASS* ayaa taas warqad kugu ogaysiin doona.
2. **Taageerada Qodobka 4** - degaan aasaasi ah iyo cunto ama tigidho lacageed.
 - Haddii aad carruur leedahay ka dib marka ay joogsato taageeradaada NASS S95*, ama haddii aadan ka tagi karin Ingiriiska ama aad codsatay in aad waddankaaga iskaa dib ugu noqoto, waxaad u qalmi kartaa taageerada Qodobka 4. **Fadlan eeg buugyaraha Refugee Action* ee ku saabsan taageerada Section4* si aad faahfaahin u hesho.**
3. **Taageerada Dawladda Hoose**
 - Haddii aad qabto dhibaatooyin caafimaad oo daran oo xagga jirka/ maskaxda ah ama aad waayeel tahay/ xanuunsanayso Local Authority* ayaa laga yaabaa in aad ka hesho degaan iyo taageero. Waxay horta u baahan doonaan in ay baaritaan kaa qaadaan - waxaa kaas loo yaqaanaa Community Care Assessment* waxuuna qaadan karaa xoogaa toddobaadyo ah.
 - Haddii aad carruur leedahay oo aadan u qalmin taageerada Qod95 ama Qod4 waa in Dawladda Hoose ay taageerto carruurtaada laakiinse waxay taageerada u diidi kartaa qof kastoo qoyskaaga ku jira ee ka weyn 18 jir.

Haddii aadan ka mid ahayn qaybaha kore waxaa laga yaabaa in ay xaafaddaada ka jiraan ururro kaa caawin kara in aad hesho degaan, cunto ama dhar.

Fadlan hawlwadeen dacwadeed weydii haddii aad su'aalo qabto.

* Ereyadani waa magaac Ingiriisi ah ee ururro ama ereyo kaloon la turjumi karin. Fadlan hawlwadeen talobixin weydiiso in uu kuu sharxo waxa ay ka dhigan yihiin.